Casharka 4

1. Miyaa Ilaah leeyahay jidh, iyo lafo iyo dhiig?
-Maya.

2. Haddii Ilaah aanu lahayn jidh, iyo lafo, iyo dhiig, waa Maxay Ilaah?
-Ilaah waa ruux.

3. Ilaah meeh?
-Ilaah wuxuu joogaa meel waliba wakhti waliba.

4. Halkee baannu Ilaah isaga qarin karnaa?
-Ilaah iskama qarin karno.

5. Meeqa Ilaah ayaa jirta?
-Waxa jira hal Ilaah.

6. Waa maxay saddexda shakhsi ee haddana isku halka Ilaah ah?
-Waa Ilaaha Aabbaha ah, Wiilka Ilaah, iyo Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah.

-Halkee bay malaa'iguhu ka yimaadeen?
-Ilaah baa iyaga abuuray Bilowgii.

-Ka hor Bilowgii, ma jirin malaa'igo nool ama la abuuray.

-Maxaa sabab u ah in Ilaah ka weynaado malaa'igaha?

-Waayo Ilaah wuxuu jiray intaanay malaa-iguhu jirin.
-Waayo Ilaah wuxuu uumay malaa'igaha.



-Waayo wuxuu kaloo nolol siiyey malaa'igaha.
-Waayo Ilaah wuxuu leeyahay awood oo dhan.

-Markii Ilaah abuuray malaa'igaha, miyuu iyagana siiyey jidh iyo dhiig?
-Maya.
-Ilaah wuxuu malaa'igaha ka dhigay ruuxyo.

-Ilaah waa ruux, malaa'iguhuna waa ruux, laakiin Ilaah baa malaa'igaha ka weyn.

-Ilaah bay awood oo dhan u sugnaatay.
-Laakiin Malaa'iguhu awood oo dhan ma lahan.

-Ilaah meel waliba ayuu joogaa wakhti waliba.
-Balse malaa'iguhu waxay joogi karaan hal meel hal wakhti.

-Maxaa Ilaah u abuuray malaa'igaha?

-Miyaa Ilaah u baahan yahay wax caawimaad ah?
-Maya. Ilaah awooddiisa mid dhammaanaysa maahan, waana Daa'im.

-Maxaa Ilaah u abuuray malaa'igaha?

-Ilaah wuxuu malaa'igaha u abuuray inay Isaga jeclaadaan.

-Ilaah wuxuu malaa'igaha u uumay inay Isaga addeecaan.
-Ilaah wuxuu malaa'igaha u uumay inay u adeegaan.

-Haddii nin uu guri dhisto, yaa iska leh gurigaas?
-Waxaa iska leh ninkii dhistay.

-Sidee buu ku yeeshay?
-Waayo isagaa guriga dhistay.

-Haddii qof haween ah ay samayso dheri, yaa iska leh dheriga?
-Dheriga waxaa iska leh haweenaydii samaysatay.

-Maxay dheriga ku yeelatay?
-Waayo iyada ayaa samaysay dheriga.

-Haddii Ilaah abuuray malaa'igaha, yaa iska leh iyaga oo dhan?
-Ilaah baa iska leh iyaga oo dhan.

-Muxuu ku yeeshay?
-Waayo Ilaah waa Kii uumay malaa'igaha.

-Waayo Ilaah wuxuu abuuray malaa'igaha, malaa'iguhana waxaa isla leh Ilaah.

-Miyaa Ilaah malaa'igaha u kala uumay kuwo wanaagan iyo kuwo xun?
-Ilaah marnaba ma abuuro wax xun.

-Wax waliba ee Ilaah ka fikiro waa wax wanaagsan oo qura..
-Wax waliba ee Ilaah yiraahdana waa wax wanaagsan oo qora.
-Wax waliba ee Ilaah sameeyana waa wax wanaagan oo qura.

-Imisa malaa'ig ayaa Ilaah uumay?

-Ilaah wuxuu uumay malaa'igo badan, oo aan la tirin karin.

-Bilowgii halkee bay ku noolaayeen malaa'igaha oo dhan?
-Waxay ku noolaayeen Samada iyagoo Ilaah la jooga.



-Samadu waa halkee?
-Samadu waa meel khaas ahaaneed ee Ilaah ku nool yahay.

-Ilaah wuxuu joogaa samada, welibana wuxuu joogaa meel waliba oo ka mid ah dunidan.

-Halkee bay ku taallaa samada?

-Garan mayno meesha ay ku taallo, laakiin samadu waxay shishaysaa, dayaxa, qorraxda, iyo xiddigaha.

-Ilaah wuxuu malaa'igaha siiyey xigmad uu iyaga ku dhex uumay iyo qurux.

-Muxuu ahaa malaggii lagu uumay xigmadda iyo quruxda?
-Kaasu waa Shayddaanka.

-Ilaah ma wuxuu u uumay Shayddaanka wanaag mise xumaan?
-Wuxuu u uumay wanaag.

-Ilaah ma uumi karo mala'g xun.
-Ilaah wuxuu amuuraa oo keliya malag wanaagsan.

-Ilaah wuxuu ku dhex uumay Shayddaanka xigmad aad u badan, laakiin, haddana xigmadda Rabbigu dhammaad ma leh.

-Ilaah wuxuu Shayddaanka ku abuuray qurux saa'id ah, laakiin haddana quruxa Ilaah dhammaad ma leh.

-Maaddaama Ilaah abuuray Shayddaanka, yaa iska leh oo uu kiisa yahay?
-Ilaah baa Shayddaanka iska leh.

-Maaddaama Ilaah abuuray Shayddaanka, waa Kuma kan ay tahay inuu addeeco?
-Ilaah.

-Bilowgii, maxaa kud hacay Shayddaanka?

-Shayddaanku wuxuu arkay xigmaddiisa iyo quruxdiisa, oo wuxuu noqday mid kibir badan.

-Shayddaanku aad iyo aad buu u kibray oo wuxuu doonayey inuu af-gambiyo Ilaah.

-Shayddaanku markii uu kibray, wuxuu doonayey inuu qaato booska ama jagada Ilaah.

-Shayddaanku wuxuu noqday mid isla weyn, oo wuxuuba doonayey in isagu uu noqdo Ilaah.

-Shayddaanku wuu kibray, oo wuxuu noqday kii kowaad ee shar sameeya.

-Waa kuma kii u horreeyey oo shar sameeya?
-Waa Shaydddaanka.

-Waa maxay sharku?

-Sharku waa sheey aanu Ilaah doonayn.
-Sharku waa wax waliba ee aanu Ilaah doonayn.

-Miyaa Ilaah garanayaa in Shayddaanku doonayey inuu af-gembiyo?



-Ilaah wuxuu garanayey fikirrada Shaydddaanka oo dhan.
-Ilaah wuxuu garanayaa fikirrada sharka leh ee shayddaanka, ka hor intaanu ku fikirin.

-Miyaa Ilaah raalli ka noqday in Shayddaanku inqilaabo?

-Bal aan taas tafaasiil idinka siiyo:

-Waxaa jiray nin xigmad lahaa oo tuuladiisa caaqil ka ahaa.

-Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa wiilkiisa, oo ah mid aan karti lahayn oo weliba nacas ah go'aan ku gaaray inuu Aabbihii ka dejiyo caaqilnimadii tuulada.

-Miyaa haddaba caaqilkii awoodda iyo xigmaddaba lahaa u oggolaanayaa wiilkiia tabarta daran oo weliba nacaska ah inuu af-gembiyo?

-Maya.
-Waa kuma kan Ilaah ka weyn?
-Ma jiro mid Ilaah ka weyn.

-Waa kuma kan Ilaah ka xigmad badan?
-Ma jiro mid Ilaah ka xigmad badan.

-Miyaa haddaba Ilaah oggolaanayaa inuu Shayddaanku inqilaabo Isaga?
-Maya.

-Waayo Shaddaanku wuxuu ahaa kii ugu horreeyey ee dembaaba, Ilaahna wuu ka beddelay magaciisii, oo horey u ahaan jiray Lucifer.

-Maxaa magaciisii loo beddelay?
-Waxaa loo beddelay Shayddaan.

-Maxaa magaca Shayddaan uu ka macne yahay?
-Magaca Shayddaanku wuxuu ka macne yahay "Cadow."

-Shayddaanku waa cadowga Ilaah.
-Shayddaanku waa cadowga dadka oo dahan.

-Sidee baa Ilaah ugu ciqaabay Shayddaanka sharkiisii uu sameeyey?
-Ilaah wuu u carooday Shayddaanka, wuxuuna ka soo tuuraySamada.

-Ilaah marnaba oggolaan maayo in qof shar sameeyey uu Isaga la noolaado.

-Waxaa jira malaa'igo fara badan oo Sahyddaanka ku raacay fallaagannimadii uu Ilaah kaga soo hor-jeestay.

-Maaddaama malaa'igaha soo raacay Shayddaanku ay Ilaah ku xad-gudbeen, Ilaah wuxuu beddelay magacyadoodii.

-Waa maxay magaca cusub ee la siiyey malaa'igihii Shayddaanka soo raacay?
-Jinniyo.
-Jinniyadu waa cadaawaha Ilaah.
-Jinniyadu waa cadaawaha dadka oo dhan.

-Sidee baa Ilaah u ciqaabay jinniyadii raacay Sahyddaanka?
-Ilaah wuxuu aad iyo aad ugu carooday iyaga, oo wuxuu ka soo tuuray samada.



-Ilaah qofna u fasixi maayo inuu shar sameeyo oo uu haddana isaga la sii noolaado.

-Sidee kale ayuu Ilaah u ciaqaabay Shaydddaanka iyo Jinniyadiisa?

-Ilaah wuxuu u diyaariyey Shayddaanka iyo jinniyadiisa ciqaab daa'iman ah.

-Waana Harada weyn ee dabka ah.

-Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa Ilaah Shayddaanka iyo jinniyadiisaba geynayaa harada dabka daa'imka ah ama cadaabta.

-Ilaah waa kaamil, oo wuxuu neceb yahay shar oo dhan.
-Ilaah waa kaamil, oo wuxuu had iyo goorba ciqaabaa kuwa aan isaga addeecin.

-Halkee bay shayddaanka iyo jinniyadiisu ku nool yihiin maanta?

-Shayddaanka iyo jinniyadiisu waxay ku nool yihiin maanta dunidan.

-Waa maxay waxa Shayddaanka iyo jinniyadiisu sameeyaan maanta?
-Waxay la dagaallamaan hawlaha Ilaah habeen iyo maalinba.

-Shayddaanka iyo jinniyadiisu waxay neceb yihiin Ilaah.

-Shayddaana iyo jinniyadiisu waxay kaloo neceb yihiin dadka oo dhan.